

Axdiga Xuquuqda Aadanaha iyo Mas'uuliyadaha (The Charter of Human Rights and Responsibilities)

Waa maxay Axdigu?

Axdiga Xuquuqda Aadanaha iyo Mas'uuliyadaha (Axdiga) waa sharci qeexaya xuquuqda aasaasiga ah, xoriyada, iyo mas'uuliyadaha dhammaan dadka ku nool Victoria.

Maamulka dawladda (dawladda gobolka iyo dawladda hoose, maxkamadaha, garsoorka) waa inay dhawraan xuquuqahaas. Siyaasada iyo sharciyada cusub waa in sidoo kale ay tixgeliyaan xuquuqda aadanaha.

Dadka u shaqeeya dawladda waa inay sidoo kale dhawraan xuquuqul insaanka si xubnaha bulshada aan loola dhaqmin si aan cadaalad ahayn.

Akhri macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan [mas'uuliyadaha ay mas'uuliyiinta dadweynuhu ku leeyihiin Axdiga](#).

Xaaladaha qaarkood, xuquuqaha qaar waa la xadidi karaa. Si kastaba ha ahaatee, tani waa inay noqotaa wax lagama maarmaan oo macquul ah waana inay jiraan sababo cad oo loo qaatay go'aanka.

Ka eeg oo soo dejiso nuqul buuxa oo Xeerka ah [Xeerka Xuquuqda Aadanaha iyo Mas'uuliyadaha 2006](#)

Xuquuqahee kujira Axdiga?

20 xuquuqal insaanka aasaasiga ah ayaa la ilaaliyaa, kuwaas oo ay ku jiraan:

- xuquuqda sinnaanta
- ka ilaalinta arxan darada, bini'aadantinimada ka baxsan, ama sharaf dhac
- xuquuqda cod bixinta
- xoriyatul qawlka
- xuquuqda dhaqanka.

Axdigu wuxuu aqoonsan yahay in dhammaan xuquuqaha ay la socdaan mas'uuliyado. Tan waxaa ku jira mas'uuliyadda ah in la ixtiraamo xuquuqda dadka kale. Ka eeg [liis buuxa iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan xuquuqaha](#).

Xuquuqda ma la xadidi karaa?

Xuquuqaha waxa laga yaabaa inay xaddidan yihiin oo keliya ilaa inta si cad loogu caddeeyn karo bulsho xor ah oo dimuqraadi ah, iyadoo la tixgelinayo dhammaan arrimaha khuseeya.

Mas'uuliyiinta dawladdu waxay xaddidi karaan xuquuqul insaanka marka xaddidaadyadaas qiil loogu heli karo. Tani waxay ka dhigan tahay in dawladda iyo Baarlamaanku ay sii wadi karaan inay go'aanno gaaraan iyadoo ku hadlaya magaca bulshada sida ugu wanaagsan ee loo dheelitiri karo xuquuqda, looga ilaalin karo dadka Victoria dembiyada, loona isticmaalayo maalgelinta xaddidan ee tartanka danaha dadweynaha.

Ma jiraan wax ka reeban?

Siinta tixgalinta saxda ah iyo ku dhaqanka si waafaqsan xuquuqda aadanaha ma khuseyso marka:

- Marka loo eego sharci kale, hay'ad dawladeed si macquul ah uma dhaqmi karto si ka duwan ama ma samayn karto go'aan ka duwan
- falka ama go'aanku waa dabecad gaar ah
- falka ama go'aanku wuxuu caqabad ku noqon doonaa ama ka joojinayaa urur diimeed inuu u dhaqmo si waafaqsan waxa u degan, caqiidooyinka, ama mabaadi'da diinta.

Sidee bay dadka reer Victoria faaiido ugu jirtaa Axdiga?

Axdigu waxa uu hubinayaa in dawlada gobolku ay usii waddo samaynta sharciyo cusub si cadaalad ah oo ay u hesho dheellitirka u dhexeeya awoodaha cusub iyo ilaalinta xuquuqda dadka reer Victoria.

Axdigu waxa uu horumarin karaa adeegyadayada dadweynaha iyo hab-dhaqanka waaxyaha dawladda. Waxay ka dhigi kartaa go'aannada hay'adaha dawladda kuwa caddaalad ah oo aad u adag, dejinaya heerar sharci oo cad isla markaasna xoojinaya kiisaska isbeddelka looga baahan yahay.

Axdigu wuxuu caawiyaa go'aan gaarista isagoo bixinaya qaab si sharci ah loogu dhaqmayo marka la gaarayo go'aannada adag ee ku saabsan dheellitirka danaha dadweynaha ee tartamaya.

Axdigu waxa uu wanaajiyaa habka ay dawladdu u taageerto dadka Victoria, gaar ahaan kuwa aadka loo takooro, gooni loo soocay iyo kuwa danyarta ah ee bulshadeena.

Waa maxay doorka Guddiga?

Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria (The Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission) wuxuu leeyahay laba door oo waaweyn oo hoos yimaada Axdiga:

1. Macluumaad iyo waxbaris

Waxaan ka caawinnaa dadka inay fahmaan xuquuqda iyo xorriyaadka Axdiga iyo waxa ay samayn karaan si ay uga dhigaan xaqiiqo maalinle ah. Si aan tan u samayno waxaanu:

- bixinaa macluumaad isla markaasna waxaan ka jawaabnaa su'aalaha annaga oo isticmaalayna [khadka weydiinta \(enquiry line\)](#). Annagu ma qabanno cabashooyinka la xidhiidha Axdiga
- waxaan bixinaa [waxbarasho iyo tababar \(education and training\)](#) ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka Charter.

2. Qiimaynta madax-bannaan ee ah sida Axdiga loo hirgelinayo

- Waxaan bixinaa qiimeyn joogto ah oo madax banaan oo ku saabsan tillaabooyinka ay qaadeen Dowladda Victoria, golayaasha deegaanka iyo maamulada kale ee dadweynaha si ay usoo buuxiyaan mas'uuliyadahooda hoos yimaada Axdiga.

Cabashooyinka ku saabsan Axdiga

Annagu ma qabanno cabashooyinka la xidhiidha Axdiga

Haddii aad u malaynayso in xuquuqdaada lagu xadgudbay, waa inaad la xiriirtaa [Victorian Ombudsman \(Dhexdhexaadiyaha Victoria\)](#).

Haddii aad rabto inaad cabasho ka samayso anshaxa booliiska, la xidhiidh [Guddiga Madaxbanaan ee Ladagaalanka Musuqmaasuqa](#).